

# Hagaha doorashada federaalka



  
*It's Our Vote*

# Liiska hubinta Codbixiyaha




Hubi in lagugu  
diiwaangeliyey dhanka  
cinwaankaaga hadda



Kala soco kaadhkaaga  
macluumaadka codbixiyaha  
xagga boostada



Samee qorshe aad ku  
codayso



Soo ogow cidda  
musharxiinta ka ah  
meeshaada



Keen aqoonsi marka aad  
codayneysa



Goobta doorashada ee laguu  
cayimay **maalinta**  
**doorashada**



Goobta doorashada ee laguu  
cayimay **maalmaha hordhaca**  
**ah ee codaynta**



**Xafiis kasta oo Doorasho ee**  
**Kanada** oo Kanada ku yaalla  
meel kasta ooy tahay (waqtiyo  
kama dambays ah ayaa la  
dabaqi karaa)



Habka boostada: booqo  
**elections.ca** si aad u ogaatid  
in badan (waqtiyo kama  
dambays ah ayaa la dabaqi  
karaa)

Habkani waxaa laga heli karaa luqado kala duwan dhanka **elections.ca**.  
Hababka kale, sida braille, far waaweyn iyo DAISY, nasoo wac.

# Waxa Jirta doorasho guud oo federaal ah sannadkan

Hubi in lagu diiwaangeliyey si aad u hesho kaadhka macluumaadka codbixiyaha

**Voter Information Card** / **Carte d'information de l'électeur**

**Federal Election 2019** / **Élection fédérale 2019**

**To vote, you must:**

- be a Canadian citizen
- be at least 18 years old on election day
- prove your identity and address

Visit [elections.ca](http://elections.ca) to know what ID is accepted.

Bring this card with you, along with ID, to make the voting process easier.

**Pour voter, vous devez :**

- être citoyen canadien
- avoir au moins 18 ans le jour de l'élection
- prouver votre identité et votre adresse

Visitez [elections.ca](http://elections.ca) pour connaître les pièces d'identité acceptées.

Apportez cette carte et vos pièces d'identité pour faciliter le vote.

**Incorrect name or address? Check your registration at elections.ca.** / **Nom ou adresse incorrects? Vérifiez votre inscription à elections.ca**

**To the Elector :**  
DOE, JOHN  
123 MAIN STREET  
ANYTOWN ON K1A 5T7

**À l'électeur :**  
DOE, JOHN  
123, RUE MAIN  
ANYTOWN ON K1A 5T7

**elections.ca**

**Haddii lagu diiwan geliyey**, waxaad heli doontaa kaadhka macluumaadka codbixiyaha xagga boostada ka dib marka doorashada la iclaamiyo. Waxay kuu sheegaysaa meesha iyo goorta aad codayn karto. Keenso kaadhkan, adigoo wata aqoonsi la aqbalay, markaad tagto inaad codayso si habka codaynta looga dhigo mid sahlan.

**Haddii aadan helin kaadhka, ama haddii macluumaadka ku qorani uu khaldan yahay**, waxaa laga yaabaa in aanad diiwaan gashaneyn ama macluumaadka cod-bixiyahaagu aanu ahayn mid cusbooneysiisan ilaa iyo taariikhdan. Booqo [elections.ca](http://elections.ca) ama naga soo wac halkan 1-800-463-6868 si aad u hubiso una cusbooneysiiso diiwaangelintaada. Waxaad sidoo kale is-diiwaangelin kartaa markaad tagto inaad codkaaga dhiibato.

**Si aad isu diiwaangeliso una codayso doorashada federaalka, waa inaad:**

- Tahay muwaadin Kanadiyaan ah
- Tahay ugu yaraan 18 sano jir maalinta codaynta
- Caddeyso aqoonsigaaga iyo cinwaankaaga

# Siyaabaha loo codeeyo

**Waxaad codayn kartaa goor kasta oo ay tahay mudada codaynta.**  
Dooro habka codaynta kuugu habboon adiga.

## 1 Maalinta codaynta

Goobta codaynta ee lagu cayimay wuxuu furnaan doonaa muddo 12 saacadood ah (saacaduhu way kala duwanaan karaan xagga gobolada).

## 2 Maalmaha hordhaca ah ee codaynta

Goobta codaynta ee lagu cayimay wuxuu furnaan doonaa marka laga bilaabo 9:00 subaxnimo ilaa 9:00 fiidnimo ee maalinta Jimcaha, Sabtida, Axadda iyo Isniinta ee todobaadka ka horreeya maalinta codaynta.

## 3 Meel kastoo ka mid ah xafiiska Doorashooyinka Kanada ee Kanada guud ahaan

Tag xafiiska kasta ee doorashooyinka Kanada ka hor maalinta Talaadada ee ka horreeya maalinta doorashada saacadda 6:00 galabnimo. Waxaad codayn doontaa adiga oo isticmaalaya habka codbixinta gaarka ah. Kadib marka doorashada la iclaamiyo, booqo **elections.ca** ama nasoo wac si aad u hesho xafiiska kuugu dhow.

## 4 Habka Boostada

Booqo **elections.ca** nasoo wac si aad u ogaato wax kasii badan. Waxaa la dabaqi karaa waqtiyo kama dambeys ah.

Ka hubi **kaadhkaaga macluumaadka codaynta** ee maalmaha codayntaada, meelaha iyo waqtiyada.

# Aqoonsiga lagu codeeyo

Waxaad heysataa saddex Ikhtiyaar oo aad ku caddeeyso aqoonsigaaga iyo cinwaankaaga.

## Ikhtiyaarka 1



### Muuji mid ka mid aqoonsiyada

- ruqsaddaada darawalnimada
- kaadh kastoo kale oo laga bixiyey dhanka dawladda Kanada (federaal, gobol/teritori ama degmo) oo uu ku yaallo sawirkaaga, magacaaga iyo cinwaanka hadda

ama

## Ikhtiyaarka 2



### Muuji laba wax oo Aqoonsi

Labaduba waa inuu ka muuqdaa magacaaga iyadoo ugu yaraan midkood leeyahay cinwaankaaga hadda.

+



### Tusaalooyin:

- kaadhka macluumaadka codbixiyaha iyo warbixin bangi
- biilasha korontada iyo kaadhka aqoonsiga ardayga

### Kuwani ma heysatid? Dhibaato ma leh!

Waxa jira kuwo kale oo aqoonsi la aqbalay. Ka hubi liiska oo dhan xagga [elections.ca](https://elections.ca)

ama

## Ikhtiyaarka 3



### Haddii aanad heysan aqoonsi

Weli waad codayn kartaa haddaad caddayso aqoonsigaaga iyo cinwaankaaga qoraal ahaan oo aad wadato qof ku yaqaanna iyo cidda loo cayimey goobta codbixintaada ee adiga kuu hadla.

+



Qofka kuu hadlayaa waa inuu awoodaa inuu caddeeyo aqoonsigiisa iyo cinwaankiisa. Qofku waxa uu u hadli karaa qof keliya (marka laga reebo hay'adaha daryeelka muddada dheer).

# Sida loo soo gelaayo



**Dhammaan kuwa wax dooranaya waxaa loo cayimey goobo codayn ee maalinta doorashada iyo maalmaha hordhaca ah ee codaynta.** Kadib iclaaminta doorashada, waxaad hubisaa in goobaha codaynta ee lagu cayimey ay leeyihiin habka baahiyahaaga soo gelitaanka adigoo:


- hubinaaya kaadhka macluumaadka codbixiyaha;
- geliya koodhka boostadaada xagga sanduuqa macluumaadka adeegga codbixiyaha halkan [elections.ca](https://elections.ca); ama
- naga soo wacaya halkan **1-800-463-6868** ama **1-800-361-8935 (TTY)**.

Haddii aad wax tabashooyin ah ka qabto dhanka helitaanka goobaha doorashada lagu cayimey, naga soo wac.

Si aad horay u codsato gargaar xagga codbixinta, oo ay ku jiraan luqadda iyo tarjumaadda luqadda calaamadaha, wac Xafiiska Doorashooyinka Kanada ee goobtaada codaynta ka hor maalinta Talaadada ka hor maalinta doorashada, 6:00 galabnimo.


## Gargaarka qalabka codaynta iyo adeyada maalinta doorashada:

**Warqad ballaadhan oo codayn** oo ay ku yaallaan magacyada musharraxiinta oo lagu qoray **far waaweyn**



**Wax ballaadhiyayaal (4x)**

**Far waaweyn iyo liisas braille ah** ee musharraxiinta



**Qalin qabasho ballaadhan leh**

**Taabasho iyo braille ee looxadda codaynta**



**Gargaarka calaamadeynta codayntaada**

**X**  
*It's Our Vote*